



Waxa jirta sababo kooban oo uu mulkiilahu gurigu kaaga saari karo hadda

Guriga lagaama saari karo haddii sababta aad ijaarka u bixin kari waydey ay tahay COVID-19 awgeed, sida ku xusan amarada guri kasaarista ee fadaraalka iyo gobolkaba, illaa Juun 30, 2021

Guriga waa lagaa saari karaa haddii aad sababtid wax si degdeg ah dhib weyn u gaadhsiin kara caafimaadka, amaanka ama hantida*

Weli adiga ayaa masuul ka ah bixinta iijaarkaaga. Haddii aad bixin weydid, lacag intaa ka badan ayaa lagugu lahaan doonaa!

**Amarka fadaraalku waxa uu ka mamnuucayaa mulkiilaha in uu guriga kaa saaro sidaa awgeed guriga way u soo guuri karaan ama iibin karaan.*

Haddii aad bixin kari waydid dhammaan iijaarka lagugu leeyahay, mulkiilahaagu waa in uu kuu soo bandhigaa qorshe qoran oo macquul ah oo aad ku bixin kartid iijaarka.

Haddii mulkiilahaagu isku dayo inuu kaa saaro guriga, isku day in aad sida ugu dhakhsaha badan u raadsatid gargaar sharci.

Haddii aad deggan tahay King County, Wac (253) 234-4204, Housing Justice Project

Haddii aad deggan tahay degmooyinka kale ee Washington, wac 'NJP' khadkooda tooska ah ee CLEAR Hotline taleefankoodu yahay (888) 201-1014 maalmaha shaqada inta u dhexeysa 9:15 subaxnimo iyo 12:15 duhurnimo.

Ka codso barta internet-ka:

[CLEAR*Online nwjustice.org/get-legal-help](https://www.nwjustice.org/get-legal-help)

Booqo www.WashingtonLawHelp.org si aad ugu heshid waraaqo tusaale ah oo aad ka fiirsato habka aad warqada aad u dirayso mulkiilahaaga aad u qori lahayd iyo warbixin gargaar sharci oo bilaa lacag ah, foomam iyo fiidyowada.